

OFFICIAL

Mudanaha/Marwada guriga degan

Homes Victoria waxay qoraalkan kuugu soo diraysaa inay kula socodsiiiso halka ay marayaan howlihii lagu Dhisayay Guryaha Badan (Big Housing Build) iyo barnaamijka dib-u-dhiska saraha dhaadheer.

Marxaladdii xigtay ee barnaamijka ayaa hadda ka socota 7 goobood oo cusub. Taasi micnaheedu waxay tahay inay hada meel fiican noo marayaan dhisida aan 9 xaafadood uga dhiseyno guryo loogu talagalay dadka meesha degan hada iyo kuwa mustaqbalka soo degi doonaba guryahaas oo noqon doona kuwo ka fiican, ka amni wanaagsan iyo kana raaxo badan guryihii hore.

Waxyaabaha maanta lagu dhawaaqay?

Maanta, waxaan dadka guryaha degan kala hadalnay dib u dhiska lagu sameynayo dhismayaashan:

- 25 iyo 27 King Street, Prahran
- 150 Victoria Avenue, Albert Park
- 150 Inkerman Street, St Kilda
- 159 Melrose Street, Waqooyiga Melbourne
- 29 Crown Street, Flemington
- 94 Ormond Street, Kensington

Waxaan si joogto ah xiriir ula sameyn doonaa dadka degan goobaha cusub **Laga bilaabo bisha Luulyo 2026 ilaa bisha Febraayo 2028**, waxaan si dhow ula shaqeyn doonaa qoysaskan si aan uga caawinno inay u guuraan guri ku habboon inta aan ka diyaarineyno guryo ka tiro badan kana tayo fiican kuwii hore.

Qorshaha lagaaga caawinayo guuritaanka

Qoysaska degan **139 Highett Street, 6 iyo 8 Anderson Court, 1–5, 7 iyo 9 Williams Court iyo 111, 119 iyo 127 Elizabeth Street Richmond** ayaa wali sii wada howlihii guuritaanka.

Ku dhawaad 85% qoysaska ayaa mar hore guuray, ama hada ayay qorsheynayaan inay guuraan, dhammaantoodna waxaa meel fiican u maraya howlaha guuritaanka si ay usoo gebagebeeyaan bisha Febraayo 2026.

In lagu caawiyo inta ay howlahan oo dhan socdaan

Waxaan idiin diyaarinay oo heegan idiin ah koox idinka caawin doonta guuritaanka:

Kooxdani waxay si dhow ula shaqeyneynayeen dadka deegaanka si ay u fahmaan baahiyahaaga iyo waxa aad doonayso. Macluumaadkani wuxuu muhiim u yahay inuu naga caawiyo sidii aan kuugu heli lahayn guri daboolaya baahiyahaaga.

Waxaan halkaan u joognaa inaan kula kulanno: Waad noo sheegi kartaa haddii aad jeclaan lahayd inaad soo kaxaysato qof qoyskaaga ka tirsan, saaxiib, ama la-taliye markasta oo aad nala kulmayso. Waxaan sidoo kale kuu diyaarin karnaa turjubaan.

Xuquuqda aad leedahay sideedii ayay sii ahaan doontaa: Guriga aad u guurayso waxaad ku heli doontaa xuquuq iyo xaqdhowr la mid ah taadii hore sida uu dhigayo Xeerka Kirada Guryaha.

In lagaa caawiyo howlaha guuritaanka: Waxaan kuu diyaarin doonaa dad alaabaha kuu rara, iyo inaan kuusoo xirno waxyaabaha ay ka midka yihiin taleefanka, internetka iyo waraaqaha boostada oo lagu soo wareejiyo, waxaana sidoo kale kugu xiri doonaa adeegyada caafimaadka iyo kuwa dadka caawiya.

Inaad dib usoo noqoto: Marka howlaha dib-u-dhiska la dhammeystiro, waxaad ku laaban kartaa xaafaddaada waxayna ku xiran tahay inaad markaas ayada ah u qalanto, iyo baahiyahaaga iyo sidoo kale inay guryaha cusub kugu habboon yihiin iyo in kale.

Nagu xirnoow

Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad baahiyahaaga guri iyo dhammaan meelaha suurtoogalka ah ee ku habboon qoyskaaga kala hadasho howlwadeenka u xilsaaran dib-u-dejintaada.

Waxaad si toos ah ula xiriiri kartaa howlwadeenka u xilsaaran dib-u-dejintaada ama waxaad kooxda u xilsaaran howlaha dib-u-dejinta iimayl ugu diri kartaa relocationsteam@homes.vic.gov.au.

search **homes victoria**



homes.vic.gov.au



Hel xog badan

- Adoo booqanaya homes.vic.gov.au
- La hadal xafiiska guryeynta deegaankaaga
- Ka wac khadka taageerada ee heeganka kuu ah 1800 716 866

Mahadsanid

Simon Newport

Madaxa Fulinta
ee Homes Victoria

28/01/2026

search **homes victoria**



homes.vic.gov.au

